

The Public Health Lab: Emergency Preparedness and Response

Somali translation of summary

Barnaamijka u diyaargarowga xaaladaha degdega ah iyo ka jawaabistooda iyadoo lala kaashanayo shaybaadhka deegaanka iyo cudurrada faafa.

Barnaamijku wuxuu la shaqeeyaa sharci fulinta maxalliga ah, hay'adaha gobolka iyo federaalka si ay uga jawaabaan xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha.

Muunado shaki leh oo ay soo diraan bahwadaagta ayuu barnaamijkan baaraa.

Barnaamijka u diyaargarowga xaaladaha degdega ah iyo ka jawaabistooda waxa uu leeyahay shaqaale gaar ah iyo qalab lagu falanqeeyo walxaha waxyeelada leh.

Barnaamijku waa qayb ka mid ah shabakadaha qaranka ee ka shaqeeya ilaalinta awoodda inay si degdeg ah oo wax ku ool ah uga falceliyaan khataraha caafimaadka iyo badbaadada reer Minnesota.

Shaybaadhka qaalibsan caafimaadka dadweynaha ee u diyaargarowga xaaladaha degdega ah iyo ka jawaabistooda ee Minnesota wuxu had iyo jeer diyaar u yahay inuu ka jawaabo xaaladaha degdegga ah ee yaryar iyo kuwa waaweyn labadaba.